# Waxaa kuu keenay **Gobalka Oregon**

**Gobalka Oregon ayaa la shaqaynaaya HealthCare.gov si looga caawiyo dadka reer Oregon helitaanka caymis caafimaad.**

## Dhib ma ku qabtaa caymiskaaga?

Haddii aad dhib ku qabto kadib marka aad iska diiwaan gelisay caymis, la xiriir Waaxda Xeerarka Dhaqaalaha ee Oregon.

**Booqo**
orhim.info/DFRcomplaint
**Wac**
888-877-4894 (wicitaan bilaash ah)
**Iimeylka**
DFR.InsuranceHelp@dcbs.oregon.gov

## Luuqadaha kale ama qaababka?

Wac **855-268-3767** (wicitaanka bilaashka ah) laga bilaabo 8 a.m. ilaa 5 p.m. Isniinta ilaa Jimcada si aad xogtaan ugu codsato luuqadaha Español, Русский, Tiếng Việt, 汉语, 漢語, large print, or another format.

OREGON HEALTHCARE.GOV
855-268-3767 (toll-free)

HIM-5069 (09/2024)

# **Caymiska caafimaadka** oo aad helaysaan adiga iyo shaqaalahaagu



Tusmo loogu talo galay ganacsiyada yaryar

**Visit OregonHealthCare.gov**

# Hel caymis **qiimo jaban** oo aad helaysaan adiga iyo shaqaalahaaga

Ayadoo aan loo eegayn xajmiga shirkada, shirkad kasta waxay u baahan tahay shaqaale caafimaad qaba, laakiin ganacsiyada yaryar ayaa leh caqabado gaar ah. Barnaamijka Dookhyada Caafimaadka ee Ganacsiyada Yaryar (Small Business Health Options Program, SHOP)) ee Oregon ayaa ka caawiya ganacsiyada yaryar iyo haayadaha khayriga ah ee ku dhaqan Oregon si ay caymis caafimaad u siiyaan shaqaalahooda.

## MA HAYSATID SHAQAALE MIYAA?
### Iska diiwaan geli HealthCare.gov

Haddii aadan haysan shaqaale, waxaad u qalmi kartaa qorshaha caymiska caafimaadka ee lagu bixiyo **HealthCare.gov**, halkaan oo aad ka iibsan karto iskuna barbardhigi karto caymisyada.

**HealthCare.gov** waa meesha keliya ee aad ka heli karto canshuur dhaafyo si ay kaaga caawiyaan bixinta lacagaha joogtada ah iyo qarashaadka aad jeebkaaga ka dhiibayso sida qaybta caymiska iyo lacagaha caymisku jarto.

Booqo **HealthCare.gov** ama wac **800-318- 2596** (wicitaan bilaash ah) si aad isku diiwaan geliso. Waxaad sidoo kale booqan kartaa **OregonHealthCare.gov** ama wici kartaa **855-268-3767** (wicitaan bilaash ah) si aad u hesho caawimaad BILAASH AH, oo toos ah si aad isku diiwaan geliso.

Ka fiiri caymiska, qorsheyaasha iyo kaydadka aad heli karto OregonHealthCare.gov.

Ka fiiri caymiska, qorsheyaasha iyo kaydadka aad heli karto **OregonHealthCare.gov**.

## XASUUSNOOW TAARIIKHAHAAN MUHIIMKA AH.

### NUFEEMBAR 1

Maalinta koowaad si aad isku diiwaan geliso, u cusbooneysiiso, ama u badesho qorsheyaasha.

### JANAAYO 15

Maalinta ugu danbaysa si aad isku diiwaan geliso, u cusbooneysiiso, ama u badesho qorsheyaasha.

### FURSADA LABAAD EE ISDIIWAAN GELINTA

Waxaad u qalmi kartaa mudada diiwaan gelinta gaarka ah haddii ay kugu dhacdo isbadel wayn oo nololeed. Tan waxaa ku jira isbadellada sida in ilmo kuu dhasho, inaad guursato ama aad isfurtaan xaaskaaga, isbadellada ku dhaca dakhligaaga. Si aad u hesho xog dheeri ah booqo **HealthCare.gov**.

## Ma kuu joogaan shaqaale mana doonaysaa inaad bixiso caymis?

Waxaad la shaqeyn kartaa wakiilka caymiska ama shirkada caymiska si aad shaqaalahaaga ugu hesho caymiska saxda ah ee kooxda. Ganacsiyada yaryar qaarkood ayaa u qalmi kara canshuur dhaaf si looga caawiyo bixinta qarashka caymiska haddii ay iibsadaan qorshe shahaado leh.

Haddii aadan caymis siin shaqaalahaaga, ku boori inay helaan caymiskooda gaarka ah oo ay ka helayaan HealthCare.gov, halkaas oo ay u qalmi karaan caawimaad dhaqaale si looga caawiyo bixinta qarashaadka caymiska.

**Miyaan u qalmaa Canshuur Dhaafka Daryeelka caafimaadka ee Ganacsiyada Yaryar?**

**Canshuur Dhaafka Daryeelka caafimaadka ee Ganacsiyada Yaryar** ee IRS ayaa ka caawiya ganacsiyada yaryar ee u qalma yareynta kharashka bixinta caymiska caafimaadka ee shaqaalaha. Ganacsiyada yaryar ee Oregon waa inay buuxiyaan shuruudaha soo socda ee ugu yar si ay ugu qalmaan canshuur dhaaf:

- Canshuur Dhaafka Daryeelka caafimaadka ee Ganacsiyada Yaryar ee IRS ayaa ka caawiya ganacsiyada yaryar ee u qalma yareynta kharashka bixinta caymiska caafimaadka ee shaqaalaha. Ganacsiyada yaryar ee Oregon waa inay buuxiyaan shuruudaha soo socda ee ugu yar si ay ugu qalmaan canshuur dhaaf:
- Canshuur Dhaafka Daryeelka caafimaadka ee Ganacsiyada Yaryar ee IRS ayaa ka caawiya ganacsiyada yaryar ee u qalma yareynta kharashka bixinta caymiska caafimaadka ee shaqaalaha. Ganacsiyada yaryar ee Oregon waa inay buuxiyaan shuruudaha soo socda ee ugu yar si ay ugu qalmaan canshuur dhaaf:
- Canshuur Dhaafka Daryeelka caafimaadka ee Ganacsiyada Yaryar ee IRS ayaa ka caawiya ganacsiyada yaryar ee u qalma yareynta kharashka bixinta caymiska caafimaadka ee shaqaalaha. Ganacsiyada yaryar ee Oregon waa inay buuxiyaan shuruudaha soo socda ee ugu yar si ay ugu qalmaan canshuur dhaaf:
- Canshuur Dhaafka Daryeelka caafimaadka ee Ganacsiyada Yaryar ee IRS ayaa ka caawiya ganacsiyada yaryar ee u qalma yareynta kharashka bixinta caymiska caafimaadka ee shaqaalaha. Ganacsiyada yaryar ee Oregon waa inay buuxiyaan shuruudaha soo socda ee ugu yar si ay ugu qalmaan canshuur dhaaf:

Xog dheeri ah ka fiiri **OregonHealthCare.gov.**

## Ka waran haddii shaqaale uu diido yaboohayga caymiska?

Haddii qorshaha caymiska aad bixiso uu buuxiyo heerarka qaar ee u qalmida iyo daboolista, laakiin shaqaale uu diido inuu iska diiwaan gasho, shaqaalaha ayaa iska diiwaan gelin kara qorshe uu ka helaayo HealthCare.gov inta lagu jiro mudada diiwaan gelintu furan tahay (Nufeembar 1 ilaa Janaayo 15). Xasuusi shaqaalahaaga in uusan u qalmi doonin caawimaad dhaqaale.

## Ma waxaan u baahan nahay inaan caymis siiyo shaqaalahayga?

Haddii ay kuu joogaan shaqaale kayar 50 oo wakhti buuxa shaqeeya (FTE), qasab maaha inaad siiso caymis, mana waajihi doontid ganaax ka dhalanaaya inaadan caymis siin. Loo shaqeeyaasha ay ku joogaan 50 shaqaale ah ama ka badan oo FTE ah ayaa waajahaaya ganaax haddii aysan caymis caafimaad oo qiimo jaban oo daboolaaya heerarka ugu yar ee caymiska siin shaqaalahooda. Caymiska qiimaha jaban waa caymis ku kacaaya ugu badnaan 9.02 boqolkiiba mushaarka sanadkii ee shaqaalaha sanadka 2025.

Ganaaxyada a qaado IRS ayaa lagu xisaabiyaa sida soo socota:

- Inaan wax caymis ah la bixin: $2,500 x (FTEs – 30) sanadkii
- Caymiska la bixiyay, laakiin uusan ahayn mid qiimo jaban ama uusan buuxin shuruudaha qiimaha ugu hooseeya: Kayar xisaabta kore ama $3,750 x FTEs helay Canshuur Dhaafka Lacagaha Joogtada ah ee Dheeriga ah

Tusaale, haddii loo shaqeeye uu leeyahay 50 shaqaale ah, 21 kamid ah ay caymis ka helaan HealthCare. gov, uusana siin caymis buuxinaaya shuruudaha, loo shaqeeyaha ayaa bixin doona ganaax dhan $50,000 ($2,500 x 20 = $50,000). Booqo irs.gov si aad xog badan uga ogaato Lacagta Masuuliyad Wadareedka Loo shaqeeyaha.

**Ma qasab baa inaan caymis siiyo xaasaska iyo carruurta shaqaalaha?**

Maya, laakiin haddii aadan awoodin inaad caymis siiso xaasaska iyo carruurta shaqaalaha, waxay u qalmi karaan caawimaad dhaqaale si ay u bixiyaan qarashka daryeelka caafimaadka. Ma jiro ganaax canshuureed lagu xukumaayo ganacsigaaga haddii ay helaan caawimaad dhaqaale. Waxay iska diiwaan gelin karaan **HealthCare.gov** ama ayagoo wacaaya **800-318 -2596** (wicitaan bilaash ah) si isku diiwaan gashaan. Waxay sidoo kale booqan karaan **OregonHealthCare.gov** ama wac **855-268-3767** (wicitaan bilaash ah) si ay u helaan khabiirka caymiska ee maxaliga ah si uu uga caawiyo helitaanka caymiska saxda ah.

## WAA MAXAY CAYMISKA SHOP?

Ganacsi kasta oo yar oo ku yaala Oregon ayna u shaqeeyaan hal ilaa 50 shaqaale ah ayaa caymis aqoonsi leh toos uga iibsan kara midkood shirkadaha caymiska ee barnaamijka ku jirta Haddii aad leedahay ganacsi yar oo ay u shaqeeyaan shaqaale kayar 25 shaqaalaha wakhtiga buuxa ah, waxaad u qalmi kartaa Canshuur dhaafka Daryeelka caafimaadka ee Ganacsiyada yaryar. **Ganacsigaaga ayaa u qalma SHOP haddii aad:**

- Leedahay xafiis ama goobta shaqada ee shaqaalaha oo ku taala gudaha aagga adeegga SHOP.
- Ay kuu joogaan 50 shaqaalaha FTE ah ama ka badan.
- Aad siiso dhammaan shaqaalahaaga FTE (ay shaqeeyaan ku dhawaad 30 saacadood ama ka badan asbuucii).
- Aad ka diiwaan geliso ugu yaraan 70 boqolkiiba shaqaalahaaga FTE caymiskaaga SHOP. Shaqaalaha leh caymiska ay ka helaan qorshaha loo shaqeeye kale, Medicare, medicaid, milatariga, ama barnaamijyada hawlgabka ciidanka ayaan lagu darayn xisaabta.

(Loo shaqeeyaasha iska diiwaan geliya caymiska SHOP inta u dhaxaysa Nufeembar 15 iyo Diseembar 15 sanad kasta ayaa bixin kara caymiska SHOP ayagoo aan buuxin shardigaan boqoleeyda.)

